

Helsinki

# Waxqabadka galabtii ee iskoollayda



# Maxaa la sameynayaa maalin dugsiyeedka kaddib?

## U codso cunuggaaga booska waxqabadka galabti 22.3.–23.4.2021

Waxqabadka galabti ee iskoolleydu waa hawl wanaagsan oo noocyo badan oo dugsiya kaddib la qabto oo ku socda ardayda fasallada 1-2 iyo caruurta go'aanka taageerada gaarka ah helay

Waxqabadka galabti waxaa ku jira ciyaar iyo waxqabadka la hago oo isbedbeddela. Cunuggu wuxuu halkaas wakhti kula qaataa carruurta kale, wuxuu ka helayaa saaxiibo cusub wuxuuna ku baranayaa afka finnishka. Waxqabadka waxaa ku jira bannaan aadis maalin kasta ah. Adeegga lacagta ah waxaa ku jira casariye.

Hagayaal tababaran ayaa galabti ku dadaalaya waxqabadka iyo ammaanka carruurta.

## Kharashka

- illaa iyo saacadda 16 galabnimo waa 100 €/bishi
- illaa iyo saacadda 17 galabnimo waa 120 €/bishi

Waa suuro gal in iyadoo lagu saleynayo dakhliga waalidka la dalbado ka fududeyn lacagta ah ama in laga fasaxo bixinta lacagta

Macluumaad ku saabsan boosaska waxqabadka galabti ee nawaaxigaaga waxaad ka haysaa [iltapaivahaku.hel.fi](http://iltapaivahaku.hel.fi) [afternoonsearch.hel.fi/](http://afternoonsearch.hel.fi/)

## Maarso

- Wakhtiga dalbashadu wuxuu bilaabmayaa **Maarso 22.3.2021**
- Hagitaanka iyo foomka dalbashada waxaad ka haysaa [hel.fi/iltapaivatoiminta](http://hel.fi/iltapaivatoiminta)
- Foomka dalabka waxaa la soo celinayaa muddada dalabka dhexdeeda

## Abriil

- Wakhtiga dalbashadu wuxuu dhamaanayaa **23.4.2021**

## Juun

- Waxqabadka galabti iyo dugsiyaduba waxey xagaaga ku jiraan fasax

# Xog muhiim u ah in waxqabadka galabti laga ogaado

## Codsashada booska

- Waxqabadka galabti waxaa la soo dalbadaa muddada dalabka waxaana lag dalbadaa foomka dalabka.
- Cunuggiiba waxaa laga buuxinayaa hal codsi.
- Haddii booska la dalbado wakhtiga dalbashada dabadii, lama balanqaadi karo booska. Mas'uulka ayaa lala xiriirayaa haddii boos la helo.

## Go'aanka booska

- Go'aanka boosto ahaan ayaa guriga loogu soo dirayaa.
- Go'aanka boosku wuxuu noqon karaa goobta waxqabadka ee la dalbaday ma ahee mid kale. Taas markaa waxaay ka dhigantahay dalabaadka ayaa ka badnaa boosaska.
- Baajinta booska waa in qoraal ahaan loo soo gudbiyaa inta aanu iskoolku bilaaban, ugu dambeyn 11.8.2021 waxaana lagu hagaajinayaa cinwaanka [iltapaivatoiminta@hel.fi](mailto:iltapaivatoiminta@hel.fi)

## Baddalaadda booska

- Booska waxqabadka galabti guud ahaan lama baddalan karo.
- Haddii booska iskoolka ee ilmuhu uu is baddalo la xidhiidh agaasimaha nawaaxigaaga, macluumaadka xidhiidhka waxaa laga heli karaa [hel.fi/iltapaivatoiminta](http://hel.fi/iltapaivatoiminta) > Goobaha waxqabadka

## Baajinta booska

- Booska waxqabadka galabti waa la baajin karaa sannadka gudhiisa haddii aanan loo baahnayn.
- Wakhtiga baajintu waa hal bil. Tusaale ahaan haddii booska la baajiyo Oktoobar waxaay baajintu ka bilaabmayaa 1. Diisambar waxaana lagaa qaadayaa lacagta macaamiilnimada Oktoobar iyo ta Noofambar.

Foomamka dalabaadka iyo foomka ka fasaxaadda bixinta lacagta sida loo buuxbuuxinayo iyo macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sababaha looga fasaxi karo qofka bixinta lacagta oo luqado kala duwan ku qoran: [hel.fi/iltapaivatoiminta](http://hel.fi/iltapaivatoiminta) > Macluumaadka luqadaha badan ku baxa

## Luulyo

- Go'amada boostada ayaa mas'uulka ilmaha loogu dirayaa **1.7.** intaanan la gaadhin
- Bixinta lacagta waxaa loo codsan karaa fududayn ama ka fasaxaad marka uu go'aanku guriga ku soo dhaco.

## Agoosto

- Foomamka yimaado wakhtiga codsiga kaddib waxaa laga baaraandegayaa laga billaabo bisha Agoosto iyo inta lagu jiro sannadka waxqabadka.
- Goobta waxqabadka galabti waxaa la baajin karaa inta aanu iskoolku bilaabanin ugu dambayn **11.8.2021**
- Waxqabadka galabti waxey la billaabataa islamarkaasna la dhamaataa dugsiyada.

**Helsinki**